Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفدرالية
وزارة العدل والشؤون الدستورية
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
Office of the Minister

SUMMAD: WCAD/XW/3762/11/26 **Tr. 24/11/2026**

UJEEDDO: XEER WASIIR

Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS).

Markuu arkay Qodobka 122aad, faqradiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS);

Markuu arkay Qodobka 25(9) ee Xeer-nidaamiyaha Sharciga Nidaamka Xukuumadda, Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 174 ee Febraayo 2025;

Markuu tixgaliyay cabashooyinka la xiriira maamulka doorashada ku-meel-gaarka ah (**KMG**) ee Ururka Qareennada Soomaaliyeed (**UQS**);

Markuu dhagaystay Talada qareennada ee la xirirta ilaalinta midnimada mihnadlayaasha sharciga.

WUXUU XEERIYAY

Qodobka 1aad
Nidaaminta Doorashada KMG ah ee UQS

Wasaaraddu waxay soo saartay Hagaha Doorashada Ku-meel-gaarka ah ee Ururka Qareennada Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad
Muddeynta Doorashada KMG ah

Waa in doorashada Ku-meel-gaarka ah ee Ururka Qareennada Soomaaliyeed lagu qabtaa muddo labo (2) bilood ah.

Qodobka 3aad
Dhaqangal

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane Xasan Macallin Maxamuud Sheekh Cali
WASIIRKA WASAARADDA CADDAALADDA IYO ARR. DASTUURKA

Ururka Qareennada Soomaaliyeed	=**Rugahooda**=
Og: Guddiga Tala-bixinta iyo Diiwaan-gelinta Qareennada	=Rugtiisa=
Og: Wasaaradaha Caddaaladda ee Dawlad-goboleedyada	=Rugahooda=
Og: Hay'adaha Amniga	=Rugahooda=
Og: Jaamacadda Umadda Soomaaliyeed	=Rugteeda=